WISCONSIN

EDUCATION
(SOMALI)

# Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

## *Doorashooyinkaaga Daryeelka Caafimaadka oo Aad Dadka Ogeysiisid*

For an English copy, see “Health Care Directive: Making Your Health Care Choices Known,” gen-ah-96884.



Allina Health

# Dardaarankayga Daryeelka Caafimaadka

Dardaaranka daryeelka caafimaadkeyga waxaa loo sameeyay inuu hago daryeelayaasheyda igu hareereysan (qoyskeyga, saaxiibadey ama kuwa kale ee ii dhow) iyo wakiillada daryeelka caafimaadka si ay u gaaraan go'aannada daryeelka caafimaadkayga iyagoo aniga i matalaya haddii cudur ama dhaawac iga hor-istaago inaan go'aan gaaro ama aan la hadli waayo waqtiga daryeelka.

Waxaan ogahay inay tahay masuuliyaddayda in bixiyaha daryeelkayga caafimaadka, wakiiladayda daryeelka caafimaadka iyo daryeelayaasha igu hareeraysan aan kala hadlo rajooyinkayga, yoolalkayga iyo qiyamyadayda. Tani waxay ka caawin doontaa inay sida ugu fiicana awooddaada u fahmaan rabitaanadayda, hadafyadayda iyo wixii qiime ii leh oo ay wakiilkayga daryeelka caafimaadka ka caawiyaan inuu ii gaadho go'aamo waafaqsan doorashooyinkayga daryeelka caafimaadka.

**Waan fahmay in laga yaabo in wakiilkayga daryeelka caafimaadka iyo bixiyahayga (-yeyaashayda) aanay xaalad kasta awoodi karin inay fuliyaan rabitaanadayda, hadafyadayda iyo wixii qiime ii leh.**

Waxa aan sameeyay dukumentigan aniga oo in badan ka fikiray.

**Dukumenti ah dardaaran daryeel caafimaad oo kasta oo kan ka hor la sameeyay sharci ma aha ama waxba kama jiraan.**

Magacayga Sharci: ______________________________

Taariikhdayda dhalasho: ______________________________

Adreeskayga: ______________________________

Lambarkayga teleefonka: ______________________________

Lambarkayga teleefonka gacanka ama moobilka: ______________________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

# Dukumentiga Awoodda Wakiilnimo ee Daryeelka Caafimaadka

## Ogeysiis ku Socda Qofka Sameynaya Dukumentigan

Waxa aad xaq u leedahay inaad gaadhid go'aamo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga. Lagama yaabo in lagu siiyo daryeel caafimaad haddii aad diidan tahay, isla markaana waxa laga yaabaa in daryeelka caafimaadka ee lagama-maarmaanka ah aan la joojin ama la hakin haddii aad diidid.

Sababta oo ah bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka oo marrarka qaarkood ay dhici karto in aanay fursad u helin inay kula yeeshaan xidhiidh mudo dheer, badanaa lama socdaan waxa aad rumeysan tahay iyo waxa qiimaha kula leh iyo faahfaahinta xidhiidhadaada qoys ahaaneed. Taasi waxay dhib keenaysa haddii jidh ahaan ama maskax ahaan aanad awoodin inaad gaadhid go'aamo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga.

Si looga baxsado dhibaatadaas, waxa lagaa rabi karaa inaad saxeexdid dukumentigan sharciga ah si aad u cadeysid qofka aad rabtid inuu kuu gaadho go'aamo daryeel caafimaad haddii aanad awoodin in adigu aad gaadhid go'aamadaas shakhsi ahaan. Qofkaas waxa loo yaqaanaa wakiilkaaga daryeelka caafimaadka. Waa inaad xoogaa wakhti ah isa siisid oo aad fikradahaaga iyo waxa aad rumeysan tahay ee ku saabsan daweynta caafimaadka aad kala hadashid qofka ama dadka aad sheegtay. Waxa aad dukumentigan ku sheegi kartaa nooc kasta oo ah daryeel caafimaad oo aad rabtid ama aanad rabin, waxana aad cadeyn kartaa awoodda wakiilkaaga daryeelka caafimaadka. Haddii wakiilkaaga daryeelka caafimaadku uusan ogayn rabitaannadaada ku aadan go'aanka daryeel caafimaad oo khaas ah, qofkan waxaa looga baahan yahay inuu cayimo waxa dantu kuugu jirto marka go'aan la gaarayo.

Kani waa dukumenti sharci ah oo muhiim ah. Waxa uu wakiilkaaga siinayaa awood balaadhan oo uu kuugu gaadho go'aamo daryeel caafimaad. Waxa uu laalayaa ama burinayaa awood wakiilnimo daryeel caafimaad oo kasta oo aad hore u bixisay. Haddii aad rabtid inaad beddeshid Awoodda Wakiilnimada Daryeelka Caafimaadka, waxa aad dib uga noqon kartaa dukumentigan wakhti kasta marka aad burburisid, ama adiga oo qof kale u sheegaa inuu hortaada ku burburiyo, ama marka aad saxeexdid oo aad taariikheysid hadal burin, ama marka aad laba markhaati hortooda ka sheegtid inaad dib uga noqotay.

Haddii aad dib uga noqotid, waa inaad ogeysiis siisid wakiilkaaga, bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka iyo qof kale oo kasta oo aad siisay koobi. <u>Haddii wakiilkaagu yahay qof aad is qabtaan ama wehelkaaga guriga oo guurkaaga la baabi'iyo ama aad is furteen qofkii aad is qabteen ama wehelnimada guriga la joojiyo ka dib saxeexidda dukumentigan, dukumentigani waxa uu noqonayaa mid aanay waxba ka jirin.</u>

Waxa kale oo aad dukumentigan u isticmaali kartaa inaad sameysid ama diidid deeq xubin jidh ka dib geeridaada. Haddii aad dukumentigan u isticmaashid inaad sameysid ama diidid deeq xubin jidh, dukumentigani waxa uu burinayaa diiwaan ama qoraal kasta oo hore oo ku saabsan deeq xubin jidh oo aad sameysay. Waxa aad dib uga noqon kartaa ama wax ka beddeli kartaa deeq xubin jidh oo kasta oo aad ku sameysay dukumentigan adiga oo xariiq marinaya qodobada ku saabsan deeq xubin jidh ee ku qoran dukumentigan.

Ha saxeexin dukumentigan adiga oo si cad u fahmay mooyaane.

Waxaa la soo jeedinayaa in dokumiintigan oo asal ah uu kuu hayo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

# Qaybta 1: Wakiilkayga Daryeelka Caafimaadka

Waxa aan doortay in wakiil daryeel caafimaad ii hadlo:

- Haddii aanan awoodin inaan sheego ama soo gudbiyo rabitaanadayda iyo go'aamadayda daryeel caafimaad sababta oo ah cudur ama dhaawac

  **ama**

- haddii dhakhaataatiirtayda ama bixiyeyaashayda daryeel caafimaad go'aamiyaan in aanan awoodin inaan naftayda u gaadho go'aamo daryeel caafimaad.

Markaan dooranayay wakiilka daryeelka caafimaadka, waxaan tixgaliyay awooda uu qofkaasi u leeyahay inuu si ikhtiyaari ah u gaaro go'aanno ku saleysan rabitaankeyga. Waan aaminsanahay qofkaan inuu fulinayo rabitaankeyga, yoolalkeyga iyo qiyamkeyga isagoo culeys saaran yahay.

Waan fahmay in ay tahay in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu jiro 18 sanno ama ka weyn.

**Fiiro:** Haddii qofka aad u dooranaysid wakiil daryeel caafimaad uu yahay bixiye daryeel caafimaad oo hadda ku siiya daryeel ama laga yaabo inuu ku siiyo mustaqblka, waa in **aanad** qofka u dooran wakiil daryeel caafimaad iyada oo aad tihiin qaraabo dhiig, guur, wehelnimo guri oo diiwaansan ama korsasho mooyaane.

## Wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee koobaad (ugu muhiimsan) waa:

Magaca: ______________________________________________

Waxa isu tihiin ama xidhiidhka: ______________________________

Adreeska: ____________________________________________

Teleefonka (Guri) __________________ (Moobill) __________________ (Shaqo) __________________

## Wakiilka beddelka ah ee daryeelka caafimaadka

Qofkan ayaan u doortay inuu noqdo wakiilkayga beddelka ah ee daryeelka caafimaadka haddii wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee koobaad aan la heli karin ama aanuu raali ka ahayn inuu hawlgalo isaga oo ah wakiilkayga daryeelka caafimaadkaI:

Magaca: ______________________________________________

Waxa isu tihiin ama xidhiidhka: ______________________________

Adreeska: ____________________________________________

Teleefonka (Guri) __________________ (Moobill) __________________ (Shaqo) __________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Wakiillo Daryeel Caafimaad oo Beddel ah oo Dheeraad ah (ikhtiyaar)

### Wakiilka beddelka ah ee 2aad ee daryeelka caafimaadka

Qofkan ayaan u doortay inuu noqdo wakiilkayga beddelka ah ee daryeelka caafimaadka haddii wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee koobaad iyo wakiilka beddelka ah ee koowaad ee daryeelka caafimaadka aan la heli karin ama aanay raali ka ahayn inay hawlgalaaan iyaga oo ah wakiilkayga daryeelka caafimaadka:

Magaca: ____________________

Waxa isu tihiin ama xidhiidhka: ____________________

Adreeska: ____________________

Teleefonka (Guri) ____________ (Moobill) ____________ (Shaqo) ____________

### Wakiilka beddelka ah ee 3aad ee daryeelka caafimaadka

Qofkan ayaan u doortay inuu noqdo wakiilkayga beddelka ah ee daryeelka caafimaadka haddii wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee koobaad iyo wakiilladayda beddelka ah ee daryeelka caafimaadka ee kale aan la heli karin ama aanay raali ka ahayn inay hawlgalaaan iyaga oo ah wakiilkayga daryeelka caafimaadka:

Magaca: ____________________

Waxa isu tihiin ama xidhiidhka: ____________________

Adreeska: ____________________

Teleefonka (Guri) ____________ (Moobill) ____________ (Shaqo) ____________

### Wakiilka beddelka ah ee 4aad ee daryeelka caafimaadka

Qofkan ayaan u doortay inuu noqdo wakiilkayga beddelka ah ee daryeelka caafimaadka haddii wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee koobaad iyo wakiilladayda beddelka ah ee daryeelka caafimaadka ee kale aan la heli karin ama aanay raali ka ahayn inay hawlgalaaan iyaga oo ah wakiilkayga daryeelka caafimaadka:

Magaca: ____________________

Waxa isu tihiin ama xidhiidhka: ____________________

Adreeska: ____________________

Teleefonka (Guri) ____________ (Moobill) ____________ (Shaqo) ____________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Awoodaha wakiilkayga daryeelka caafimaadka

Wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuxuu si toos ah u yeelanayaa dhammaan awoodaha soo socda marka aanan awoodi karin inaan gaaro go'aannada daryeelka caafimaadkeyga marka aan daryeelka helayo::

- Inuu sameeyo go'aamo ku saabsan daryeelka caafimaadkayga, oo ay ku jiraan bilaabista, joojinta ama beddelidda daweyntayda. Waxan tan ku jira baadhisyo, dawooyin, qallitaano iyo go'aamo kale oo ku saabsan daweyn oo ay ku jirto la-tacaalista caafimaadka maskaxda ama dawooyin, marka laga reebo sida ku qoran qaybta "xadka" ee bogga 8. Haddii daweyntu tahay mid bilaabantay, wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuu wadi karaa ama joojin karaa iyada oo ku saleysan fariimo ah afka iyo/ama qoraal.
- Waxuu fasirayaa tilmaamo kasta oo dokumintigaan dhexdiisa ah si waafaqsan fahamka wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee rabitaakeyga, yoolalkeyga iyo qiyamkayga..
- Wuxu fiirin karaa oo bixin karaa diiwaanadayda caafimaadka, macluumaadka caafimaadka iyo diiwaanada shakhsi ee kale taasoo ku xidhan baahiyaha daryeelka caafimaadkayga isaga oo ah wakiil shakhsi oo hoos imanaya Xeerka Dhowrista Xisaabtaanka iyo Caymiska Caafimaadka ee 1996 (Health Insurance Portability and Accountability Act) (HIPAA) iyo xeer gobol oo kasta oo la mid ah.
- Waxuu diyaarinayaa daryeelka caafimaadkayga iyo daaweyntayda gobol kasta iyo goob kasta oo wakiilkayga daryeelka caafimaadku uu u maleynayo inay haboon tahay. (Fiiri bogga 6).
- Waxa uu go'aan ka gaadhi karaa kuwa ay noqon doonaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo hay'adaha bixin doona daryeelkayga iyo daweyntayda.

**Fiiro:** Wakiilkaaga daryeelka caafimaadka go'aamo kama gaadhi karo dhaqaalahaaga. Ku fikir inaad qareen ama looyar kala hadashid buuxinta dukumentiga Awood Wakiil Dhaqaale haddii aad rabtid inaad hubsatid inaad qof siisid go'aamo dhaqaale ama uu isaga oo wakiil kaa ah kuu qabto hawlgalo dhaqaale.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Awoodo dheeraad ah oo uu leeyahay wakiilkayga daryeelka caafimaadka

Haddii aan rabo in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu yeesho mid ka mid ah awoodahan soo socda, **waxa aan calaamad saaray** sanduuqa(-yada) hoose.

**Fiiro:** Haddii aanad magac kooban ku saxeexin sanduuq ku yaala qaybaha 1, 2 iyo 3, doorashadaada waxa loo fahmi doonaa inay tahay "maya." Tan macnaheedu waxa weeye haddii aanad doorasho sameyn, wakiilkaaga daryeelka caafimaadku ma awoodi doono inuu sameeyo go'aamadaas, waxana loo baahan doonaa amar maxkamadeed in laguu oggolaado inaad heshid daryeel iyo adeegyo gaar ah sida lagu sharaxay halka hoose marka la raaco sharciga Wisconsin.

### 1. Dhigitaanka guri daryeel ama goob deganaansho oo ku saleysan beesha

Wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuxu i dhigi karaa guri kalkaalin ama goob degenaansho oo beesha ku saleysan taaso ah joogitaano mudo gaaban oo ah daryeel kaabasho ama daryeel nasasho.

Awoodda wakiilkayga daryeelka caafimaadka ee uu igu dhigayo guri kalkaalin ama goob degenaansho oo beesha ku saleysan iyada oo ujeedadu tahay daryeel mudo dheer waa sidan soo socota:

☐ **Haa,** wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood buu u leeyahay, haddii ay lagama-maarmaan tahay, inuu i dhigo guri daryeel ama goob deganaansho oo beesha ku saleysan iyada oo ah joogitaan mudo dheer. Awooddan waxa qabanaya wixii ah xad ee aan ku qoray dukumentiga mana shaqeynayso haddii la sheego inaan korniin ahaan naafo ahay ama la sheego inaan qabo cudur maskaxda ah wakhtiga dhigitaan la soo jeediyay.

☐ **Maya,** wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood u laha inuu i dhigo guri daryeel ama goob deganaansho oo ku saleysan beesha iyada oo ah joogitaan mudo dheer.

**Waan fahmay inay tahay inaan doorto "haa" haddii aan rabo in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu awood inuu i dhigo goob daryeel mudo dheer taasoo ah joogitaan mudo dheer iyada oo aan loo baahan amar maxkamadeed.**

### 2. U diidista ama ka saarista tuubada quudinta

☐ **Haa,** wakiilkayga daryeelka caafimaadku waxuu awood u leeyahay in tuubada quudinta la iga joojiyo ama la iga saaro, haddii bixiyaha daryeelkayga caafimaadku uusan ku talin si ka duwan, iyaga oo isticmaalaya go'aan xirfadeed, oo ay ka joojinta ama ka saariddu ay ii keenayso xanuun iyo dhib. Tan waxa qabanaya wixii ah xad ee aan ku qoray dukumentigan.

**Fiiro:** Doorasho kasta oo aad qaadatid, waa laguu sii wadi doonaa in lagu siiyo dawooyinka xanuunka iyo nafisaadda iyo waliba cunto iyo cabbitaano lagaa sii afka haddii aad awoodid inaad liqdid.

☐ **Maya,** wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood u laha in la ii diido ama in la iga saaro tuubada quudinta.

**Waan fahmay inay tahay inaan doorto "haa" haddii aan rabo in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu awoodo inuu oggolaado in la iga saaro ama la diido tuubada quudinta iyada oo aanuu jirin amar maxkamadeed.**

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

### 3. Go'aamada daryeelka caafimaadka inta lagu jiro uurka

☐ **Haa,** wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuxu awood u leeyahay inuu ii gaadho go'aamo daryeel caafimaad haddii aan uur leeyahay. Tan waxa qabanaya wixii ah xad ee aan ku qoray dukumentigan.

☐ **Maya,** wakiilkayaga daryeelka caafimaadka awood uma laha inuu ii gaadho go'aamo daryeel caafimaad haddii aan uur leeyahay.

**Waan fahmay inay tahay inaan doorto "haa", haddii aan rabo in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu awoodo inuu ii gaadho go'aamo daryeel caafimaad haddii aan uur leeyahay iyada aanuu jirin amar maxkamadeed.**

☐ **Ma khuseyso.** (Doorashadan isticmaal kaliya haddii aadan awoodin inaad uur yeelato.)

### 4. Go'aamo ku saabsan daryeelka jidhkayga ka dib dhimasho

☐ Haa, wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuxu awood u leeyahay inuu gaadho go'aamo ku saabsan daryeelka jidhkayga ka dib dhimasho.

☐ Maya, wakiilkayga daryeelka caafimaadku awood uma laha inuu gaadho go'aamo ku saabsan daryeelka jidhkayga ka dib dhimasho.

### 5. Sii wadista ahaanta wakiil daryeel caafimaad haddii xidhiidhku dhammaado

☐ Haa, wakiilkayga daryeelka caafimaadka wuxu awood u leeyahay inuu sii ahaado wakiilkayga daryeelka caafimaadka xiitaa haddii guurkayagu ama xidhiidhka guri uu sharci ahaan dhammaanayo ama uu dhammaaday.

☐ Maya, wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood uma laha inuu sii ahaado wakiilkayga daryeelka caafimaadka haddii uu guurkayagu ama xidhiidhka guri uu sharci ahaan dhammaanayo ama uu dhammaaday.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Xadeynta awoodaha wakiilkayga daryeelka caafimaadka

Marka la raaco sharciga Wisconsin, wakiilkayga daryeelka caafimaadku ima dhigi karo ama iguma kalifi karo inaan bukaan-jiif ka noqdo goob loogu talogalay cudurada maskaxda, goob daryeel oo heer dhexe ah oo loogu talogalay dadka qaba naafo garaad, goob daweyn oo dawladda ah ama goob daweyn. Wakiilkayga daryeelka caafimaadku ma oggolaan karo cilmi-baadhis caafimaad maskax oo tijaabo ah ama qalliin maskax, daweyn ah shoog koronto ama habab daweyn caafimaad maskax oo daran oo la igu sameeyo.

Haddii aan doonayo inaan xaddido awoodda wakiilkayga daryeelka caafimaad ee go'aannada kale ama ficiladda uu qaadi karo, waxaan ku qoray halkaan hoose.

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Qaybta 2: Fariimahayga Daryeelka Caafimaadka

Doorashooyinkayga daryeelka caafimaadkayga waa sidan soo socota. Waxa aan wakiilkayga weydiisanayaa inuu wakiil ka noqdo doorashooyinkaas, waxana aan bixiyeyaashayda daryeelka caafimaadka weydiisanayaa inay ixtiraamaan, haddii ay dhacdo in aanan awoodin inaan sameeyo isgaadhsiin ama aanan awoodin inaan naftayda u gaadho go'aamo.

**Fiiro:** Dukumentigani wuxu wakiilkaaga daryeelka caafimaadka awood u siinaya inuu gaadho go'aamo kaliya marka:

- bixiyayaashaada daryeelka caafimaad waxay go'aamiyeen inaadan awoodin inaad gaarto go'aanadaada daryeelka caafimaad
- marka adigu aad weydiisatay in wakiilkaaga daryeelka caafimaadka uu kuu gaadho go'aamo xiitaa haddii aad awoodid inaad go'aan gaadhid ama xiitaa haddii aad awoodid inaad isgaadhsiin sameysid.

### Dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada (Cardiopulmonary resuscitation) (CPR)

Dib-u-dhaqaajinta Wadnaha iyo Sambabka (CPR) waa la-tacaalis la isticmaalo si la isugu dayo in la soo celiyo garaaca wadnaha iyo neefsashada marka ay joogsadaan. Waxa ku jiri kara cadaadin laabta ah (laabta oo xoog loo riixo si dhiigga loogu qasbo inuu wareego), dawooyin, shoog koronto, tuubo neefsasho iyo joogitaan cisbitaal.

Waxan fahamsan ahay:

- Dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabadu way badbaadin kartaa nafta laakiin markasta ma shaqeyso
- Dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabadu si fiican uguma shaqeyso dadka qaba cuduro soo jiray mudo dheer
- CPR waxay sababi kartaa dhaawacyo, in laga soo kabsado CPR-na waxay noqon kartaa mid xanuun leh oo adag.

**Waxan aan ku qoray magacayga oo kooban doorasho kasta oo aan xaaladdan u doortay.**

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

**Doorashadayda ku saabsan dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada**

☐ **Waan rabaa in dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada** la igu dayo haddii wadnahayga joogsado ama neefsashadaydu joogsato taasoo ah xaalad kasta.

☐ **Waan rabaa in dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada** la igu dayo haddii wadnahaygu joogsado ama neefsashadaydu joogsato **marka laga reebo** marka bixiyahayga daryeelka caafimaadka uu go'aamiyo in suurtagalka noolaansho yar tahay ama aanuu jirin suurtogal noolaansho oo caqli-gal ah xiitaa haddii la isticmaalo dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada.

☐ **Ma rabo in la igu dayo dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada (CPR)** haddii wadnahaygu joogsado ama neefsashadu joogsato. Waxa aan doorbiyay dhimasho dabiici ah. Haddii aan doorto ikhtiyaarkan waa inaan la hadlo bixiyahayga daryeelka caafimaadka.

## La-tacaalista lagu dheereynayo noloshayda

Haddii bixiyeyaashayda daryeelka caafimaadku go'aamiyaan inaan ku jiro xaalad ah miyir beelid aan laga soo kacayn, ama inaan maskaxda ku leeyahay dhaawac joogto ah taasoo macnaheedu yahay inay u badan tahay in miyirku/kasku ii soo noqon doonin ama aanan dib u heli doonin awoodda aan garto qof aan ahay, waxa aan doortay kan soo.

**Ogow:** Wax kastoo aad dooratay, waxaa laguu sii wadayaa in lagu siiyo daryeelka iyo daawooyinka xanuunka si lagaaga caawiyo inaad dareento nafis (tallaabooyinka nafisinta) sidoo kale cuntada iyo cabitaannada afka ayaa lagaa siinayaa haddii aad liqi kartid.

**Waxan aan ku qoray magacayga oo kooban doorashada aan xaaladdan u doortay.**

**Doorashadaydu waa:**

☐ **Waxan rabaa in la joojiyo ama la hakiyo dhammaan daweynada ama la-tacaalista** dheereynaya noloshayda wakhtigan. Tan waxa ku jira, balse kuma koobna, ku quudin tuubo, hooreyaasha faleebo (xidid) laga bixiyo, mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada, iyo antibiyootiko (dawooyin).

☐ **Waan rabaa dhammaan daweynada ama la-tacaalista** ay ku taliyeen kooxdayda daryeelka caafimaadka illaa ay ku heshiiyaan in daweynadaasi yihiin kuwo waxyeelo leh ama hadda ka dib aanay ahayn kuwo leh gargaar ama faa'iido. Tan waxa ku jira, balse kuma koobna, ku quudin tuubo, hooreyaasha faleebo (xidid) laga bixiyo, mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada, iyo antibiyootiko.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

☐ **<u>Waxan rabaa inaan helo daweyn xad leh.</u>** Waxan rabaa inaan helo noocyada daryeel qaarkood markay jiraan xaaladaha qaarkood, taasoo ah sida aan hoos ku qoray. Tusaale ahaan, waxaad qori kartaa inaad ku noolaato taageerada nololeed (life support) ilaa daryeelayaasha kugu hareeraysan oo dhan ay imaanayaan.

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

### Cudur aan lahayn ka kicitaan

Cudur aan lahayn ka kicitaan waa xaalad firfircoon oo sii xumaanaysa oo aan la bogsoon karin oo la filayo inuu keeno geeri.

**Ogow:** Wax kastoo aad dooratay, waxaa laguu sii wadayaa in lagu siiyo daryeelka iyo daawooyinka xanuunka si lagaaga caawiyo inaad dareento nafis (tallaabooyinka nafisinta) sidoo kale cuntada iyo cabitaannada afka ayaa lagaa siinayaa haddii aad liqi kartid.

**Waxan aan ku qoray magacayga oo kooban doorashada aan xaaladdan u doortay.**

**Haddii aan qabo cudur aan ka kicitaan lahayn, doorashadaydo waa:**

☐ **<u>Waxan rabaa in la joojiyo ama la hakiyo dhammaan daweynada ama la-tacaalista</u>** dheereynaya noloshayda. Tan waxa ku jira, balse kuma koobna, ku quudin tuubo, hooreyaasha faleebo (xidid) laga bixiyo, mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada, iyo antibiyootiko.

☐ **<u>Waan rabaa dhammaan daweynada ama la-tacaalista</u>** ay ku taliyeen kooxdayda daryeelka caafimaadka illaa ay ku heshiiyaan in daweynadaasi yihiin kuwo waxyeelo leh ama hadda ka dib aanay ahayn kuwo leh gargaar ama faa'iido. Tan waxa ku jira, balse kuma koobna, ku quudin tuubo, hooreyaasha faleebo (xidid) laga bixiyo, mishiinka neefsashada, dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabada, iyo antibiyootiko.

☐ **<u>Waxan rabaa inaan helo daweyn xad leh.</u>** Waxan rabaa inaan helo noocyada daryeel qaarkood markay jiraan xaaladaha qaarkood, taasoo ah sida aan hoos ku qoray. Tusaale ahaan, waxa aad qori kartaa inaad inaad rabtid in lagu siiyo antibiyootiko si loo daweeyo wixii ah caabuqyo.

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Doorashooyinkayga daweyn ama la-tacaalis ee kale (ikhtiyaar)

**Fiiro:** Halkan banaan u isticmaal inaad qortid wixii ah doorashooyin daweyn ama la-tacaalis ee aad u dooratay xaaladdaada gaarka ah. Tusaale ahaan, haddii aad qabto jirrada macaanka waxaad qori kartaa figradahaaga iyo rabitaannadaada ku saabsan kalyo-sifaynta (dialysis). Waad ka tagi kartaa meeshan oo banaan.

______________________________

______________________________

______________________________

## Deeqid xubin jidh

Deeqid xubin jidh waa deeqidda xubno jidh, indho, urur-unugyo ama qayb jidh oo kale oo aad ugu deeqaysid dad kale oo u baahan.

**Waxan aan ku qoray magacayga oo kooban doorashada aan xaaladdan u doortay.**

☐ **Ma rabo** inaan deeq u bixiyo xubnahayga, indhahayga, urur-unugyo ama qaybo jidh oo kale. Ma oggoli deeqdan ka dib marka aan dhinto.

☐ **Waan rabaa** inaan deeq u bixiyo dhammaan ama mid kasta oo ah xubnahayga, indhahayga, urur-unugyadayda ama qaybo jidh oo kale. Waan oggolahay deeqdan ka dib marka aan dhinto. Wakiilkayga daryeelka caafimaadka waxa awood loo siiyay inuu bilaabo ama sii wado daweyno ama la-tacaalisyo ama wixii ah waxqabadyo loo baahan yahay si loo daryeelo xubnahayga, indhahayga ama qayb jidh oo kale oo kasta illaa laga dhammeystirayo deeqda.

☐ **Waan rabaa** inaan deeq bixiyo, laakiin waxan rabaa inaan **xad u yeelo** deeqahayga urur-unugyo iyo xubno. Waxan amray deeqda xad leh, oo ah sida aan hoos ku qoray, ka dib marka aan dhinto. Wakiilkayga daryeelka caafimaadka waxa awood loo siiyay inuu bilaabo ama sii wado daweyno ama la-tacaalisyo ama wixii ah waxqabadyo loo baahan yahay si loo daryeelo xubnahayga, indhahayga ama qayb jidh oo kale oo kasta illaa laga dhammeystirayo deeqda.

______________________________

______________________________

☐ **Ma go'aansan** inaan deeq u bixiyo mid ka mid ah ama dhammaan xubnaha jidhkayga, indhahayga, urur-unugyadayda ama qaybo jidh oo kale. Waxan wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood u siinayaa inuu gaadho go'aanka ka dib marka aan dhinto.

**Fiiro:** Fadlan saxeex oo taariikhee wixii ah bogag dheeraad ah oo aad ku soo daraysid dukumentigan.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Baadhis sabab geeri

Baadhis sabab geeri waxa loo sameeyaa si la xaqiijiyo sababta geerida ama si loo horumariyo aqoonta caafimaadka. Waxaa jiri kara qarashyo laga qaado atobsiga (autopsy).

**Waxan aan ku qoray magacayga oo kooban doorashada aan xaaladdan u doortay.**

☐ **Ma rabo** in la sameeyo baadhis sabab geeri iyada oo sharcigu kalifayo mooyaane.

☐ **Waan u oggolaaday** in wakiilkayga daryeelka caafimaadka uu weydiisto baadhis sabab geeri haddii taasi dadka kale ka caawin karto in la fahmo sababta geeridayda ama xubnaha qoyskayga ka caawin karto inay go'aamo ka gaadhaan daryeelka mustaqbalka ee caafimaadkooda.

☐ **Ma go'aansan** inaan oggolaado baadhis sabab geeri iyo in kale. Waxan wakiilkayga daryeelka caafimaadka awood u siinayaa inuu gaadho go'aanka ka dib marka aan dhinto.

## Faalooyin ama fariimo ku socda bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka (ikhtiyaar)

**Fiiro:** Meeshan banaan u isticmaal inaad ku qortid wixii ah amaro ama fariimo dheeraad ah oo aad siinaysid kooxdaada daryeelka caafimaad ee aan lagaga hadlin dardaaranka daryeelka caafimaadka, ama si aad u balaadhisid ama u sii cadeysid rabitaanadaada, hadafyadaada iyo wixii aad qiimeysid. Waad ka tagi kartaa meeshan oo banaan.

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

**Fiiro:** Fadlan saxeex oo taariikhee wixii ah bogag dheeraad ah oo aad ku soo daraysid dukumentigan.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Faalooyin ama fariimo kale oo ku socda wakiilkayaga daryeelka caafimaadka (ikhtiyaar)

**Fiiro:** Meeshan banaan u isticmaal inaad ku qortid wixii ah amaro ama fariimo dheeraad ah oo aad siinaysid wakiilkaaga daryeelka caafimaad ee aan lagaga hadlin dardaaranka daryeelka caafimaadka. Waad ka tagi kartaa meeshan oo banaan.

Tusaale ahaan, waxa aad qori kartaa magacyada qoyska, saaxiibo ama dad kale oo kuu dhow oo aad **rabtid** ama **aanad rabin** inay qayb ka ahaadaan ka hadlidda caafimaadkaaga sida "ma rabo ______________ inuu ka qaybgalo ka hadlidda caafimaadkayga." Ama, "waxan rabaa ______________ iyo ______________ inay ka qaybgalaan ka hadlidda caafimaadkayga."

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

**Fiiro:** Fadlan saxeex oo taariikhee wixii ah bogag dheeraad ah oo aad ku soo daraysid dukumentigan.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

# Qaybta 3: Rajooyinkayga iyo Rabitaanadayda

**Ogow:** Qaybtaan waa ikhtiyaari laakiin waxtar ayay u tahay wakiilkaaga daryeelka caafimaadka iyo xubnaha daryeelka ee kugu hareereysan ee ku howlan inay kaa caawiyaan inay kuu garaan go'aannada daryeelka caafimaadkaaga ee dhammaadka noloshaada.

**Waxan rabaa dadka ku jira daryeelka caafimaadkayga iyo go'aamada daryeelka caafimaadkayga inay ogaadaan fikradahaygan iyo dareenadaydan soo socda:**

1. Waxyaabaha nolosha iiga dhiga mid u qalanta inaan sii noolaado waa (qor waxyaabaha kugu dhiirigaliya inaad toostid subixii):

2. Waxa aan rumeysan ahay in aan noloshu istaahilin mid sii jirta marka ay jiraan waxyaabahan (qor tusaalooyin ah xaaladaha ay noloshu ka xun tahay dhimashada):

3. Dooroshooyinkayga ku saabsan daweyn ama la-tacaalis gaar ah, haddii ay jiraan (waxa tan ku jiri kara doorashooyinkaaga ku saabsan mishiinada neefsashada, sifeynta kaadida (dialysis), antibiyootikada, quudinta tuubo la isticmaalayo, hoy daryeel oo qofka lagu hayo (hospice care) ama daryeelka xanuun-yareyn ah):

**Hoy Daryeel**

Hoy daryeel wuxu xoogga saaraa raaxadaada iyo tayada nolosha marka bixiyahaaga daryeelka caafimaadka uu rumeysan yahay inaad haysatid 6 bilood ama ka yar oo aad noolaatid.

**Daryeelka Xanuun-yareyn ah**

Daryeelka xanuun-yareyn ah ayaa la heli karaa haddii aad qabtid cudur heer sare ah. Wuxu xoogga saara daweynta astaamaha, arrimaha caadifadda iyo cibaadada, waxana uu adiga iyo qoyskaaga ka caawiyaa fahmidda cudurkaaga iyo doorashooyinkaaga daweynta.

**Fiiro:** Fadlan saxeex oo taariikhee wixii ah bogag dheeraad ah oo aad ku soo daraysid dukumentigan.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

4. Rajooyinkayga iyo rabitaanadayda ku saabsan sida aan rabo inaan u dhinto iyo goobta aan rabo inaan ku dhinto: (Jumladaada ku bilow "Haddii ay suurtagal tahay, waxaan jeclaan lahaa…)

5. Haddii aan dhimasho ku dhowaado, waxan aan jecelahay in la ii qabto waxyaabahan soo socda oo ah xanuun-yareyn iyo taageero: (Ka fakar siyaabo ama shayoy nafisaad keena, iyo caawinaadda dadka ku soo booqanaya.)

6. La wadaag figradahaaga iyo dareenkaaga ku saabsan sida dadka ku daryeelaya ay kuu siin karaan daryeel ruuxi ah oo sharfaya caadooyinka diintaada, dhaqankaaga ama caqiidadaada.

7. Ku taxaluqa diinteyda, ruuxiga ama caqiidada:

Waxan ahay ______________________ diin ahaan, waxana aan xubin ka ahay ______________________

oo ah beel ama jimciyad diineed (magaalo) ________________________________. Fadlan iyaga ogeysii dhimashadeyda oo u ogolow inay iyagu sameeyaan diyaargarowga dhimashada ka dib ama adeegga xuska.

Waxan doortay in la aaso/gubo. (mid goobo gali)

Tilmaamaha daryeelka jirkeyga dhimashada ka dib:

Waxan jecelahay inaan ku daro dadkan, muusigan, caadooyinkan, iwm., haddii ay suurtogal tahay:

8. Doorashooyinka/tilmaamaha kale (sida tilmaamaha ku saabsan u hibeynta jirkaaga sayniska):

**Fiiro:** Fadlan saxeex oo taariikhee wixii ah bogag dheeraad ah oo aad ku soo daraysid dukumentigan.

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

# Qaybta 4: Sida Dardaarankayga Daryeelka Caafimaadka Looga Dhigo Mid Sharci ah

Marka la fiiriyo sharciga Wisconsin, waa inaad dukumentiga ku saxeexdid oo ku taariikheysid gudaha Wisconsin adiga oo hor jooga laba markhaati.

- Shaqaalaha bulshada iyo wadaada ayaa ah kaliya ah bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee markhaati noqon kara gudaha Wisconsin.
- Dheeri ahaan, markhaatiyadaadu:
  - ma noqon karaan kuwo xigto ama qaraabo kuu ah ama kuwo loo magacaabay wakiil daryeel caafimaad gudaha dukumentigan
  - ma yeelan karaan xaq ay ku qaataan lacag ama hanti ka imanaysa dhaxalkaaga ka dib marka aad dhimatid oo ay og yihiin
  - ma noqon karaan kuwo si toos dhaqaale ahaan uga mas'uul ah daryeelka caafimaadkaaga.

**Muhiim: Si aad ugu saxeexdid magacaaga sug illaa aad hor joogsatid laba markhaati. Waa in taariikhaha saxeexiddu isku maalin yihiin.**

**Aniga oo xor ah ayaan sameeyay dukumentigan; waxan u fikirayaa si cad. Waxa uu dukumentigani sheegayaa doorashooyinkayga ku saabsan go'aamadayda daryeelka caafimaadka:**

Saxeex: ______________________________ Taariikh: ______________

Haddii aanan ku saxeexi karin magacayga, waxa aan weydiisanayaa qofka soo socda inuu ii saxeexo:

Saxeexa: ________________________________________

Magaca oo ah xuruuf kala go'an: ________________________________

Taariikh: ______________

Sababta aanan u saxeexi karin magacayga waa: ____________________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

## Laba Markhaati

Waxan cadeynayaa:

- Aniga oo goobjoog ah ayaa dokumintigaan waxaa saxiixay qofka dokumiintiga buuxinaya ama qof uu qofka buuxinaya dokumiintigani u ogolaaday inuu ka saxiixo halkiisa.
- Waxan jiraa ugu yaraan 18 sanno.
- Dukumentigani iima magacaabayo wakiil daryeel caafimaad.
- Qofka saxeexaya dukumentigan uma ahi qaraabo ama xigto dhiig, guur, wehelnimo guri oo diiwaansan ama korsasho.
- Daryeelka caafimaadka qofkan si toos ah dhaqaale ahaan anigu mas'uul ugama ahi.
- Ma ahi bixiye daryeel caafimaad oo si toos ugu adeegaya qofka wakhtigan.
- Ma ahi shaqaale (marka laga reebo shaqaale bulsho ama wadaad) u shaqeeya bixiyaha daryeelka caafimaadka ee toos ugu adeegya qofka wakhtigan.
- Ma ogi inaan xaq u leeyahay inaan dhaxlo ama qaato wax lacag ama hanti ah oo ka imanaya maalka qofka ka dib marka qofku dhinto.

**Saxeexa Markhaatiga 1:**

Saxeexa: ______________________________ Taariikh: ______________

Magaca oo ah xuruuf kala go'an: ______________________________

Adreeska : ______________________________

**Saxeexa Markhaatiga 2:**

Saxeexa: ______________________________ Taariikh: ______________

Magaca oo ah xuruuf kala go'an: ______________________________

Adreeska : ______________________________

NAME, DOB, MRN

**patient sticker**

# Qaybta 5: Talaabooyinaka Xiga

Imminka mar haddii aad buuxisay dardaarankaaga daryeelka caafimaadka, waxa kuu hadhsan dhawr talaabo oo dheeraad ah si aad u dhammeysid. Boggani kama tirsana dardaarankaaga daryeelka caafimaadka. Waad ka saari karta dukumentiga intiisa kale waxana aad u isticmaali kartaa warqad-shaqeyn.

## Liiska hubinta

- ❑ Koobiga asal ah ee dardaarankaaga daryeelka caafimaadka ku hayso meel si fudud looga heli karo.
- ❑ Koobi ah dardaarankaaga daryeelka caafimaadka sii wakiilkaaga daryeelka caafimaadka, bixiyahaaga (bixiyeyaashaada) daryeelka caafimaadka (si inta la sawiro loogu daro diiwaankaaga caafimaadka) iyo kuwa laga yaabo inay ka qaybgalaan daryeelka caafimaadkaaga ama ama kuwa gargaar ka geysanaya in go'aamo daryeel caafimaad laguu gaadho.
- ❑ La hadal qof kasta oo daryeelkaaga lug ku leh haddii aad qabtid cudur ama dhaawac culus. U hubso inay og yihiin qofka uu yahay wakiilkaaga daryeelka caafimaadka oo ay fahamsan yihiin rabitaanadaada, hadafyadaada iyo wixii aad qiimeysid.
- ❑ Haddii aad tagtid cisbitaal ama hoy daryeel, sii qaado koobi ah dardaarankaaga daryeelka caafimaadka oo weydiiso in lagu daro diiwaankaaga caafimaadka.
- ❑ Dib u fiiri, jadiidi ama buuxi dardaaran daryeel caafimaad oo cusub ugu yaraan 5 sanno kasta ama haddii ay jiraan waxyaabahan:
  - — waxaa jira isbadal xariir, sida furriin, kala fogaasho ama dhimasho
  - — waxa lagugu sheegay xaalad caafimaad oo culus
  - — xaaladdaada caafimaad ayaa si weyn u sii xumaatay, gaar ahaan haddii aanad awoodin inaad daryeeshid naftaada ama aanad awoodin inaad kaligaa noolaatid
  - — wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ayaan hadda raali ka ahayn ama awoodin inuu hawlgalo.
- ❑ Haddii doorashooyinkaagu is beddelaan, buuxi dardaaran daryeel caafimaad oo cusub oo koobiyo cusub sii wakiilkaaga daryeelka caafimaadka, bixiyahaaga (bixiyeyaashaada) daryeelka caafimaadka, iyo dadka kale ee lagu yaabo inay lug ku leeyihiin daryeelka caafimaadkaaga ama gargaar ka geystaan in laguu gaadho go'aamo daryeel caafimaad iyo qof kasta oo haysta koobiyo hore oo ah dardaarankaaga daryeelka caafimaadka. U sheeg waxa isbeddelay iyo inay burburiyaan koobiyadii hore.

## Ayaa koobiyo ka haysta dukumentigan

Sii nuqul dokumintigaan ah wakiilkaaga daryeelka caafimaadka; daryeel bixiyahaaga caafimaadka; hogaamiyaha diinta, ruuxiga ama caqiidada; iyo kuwa laga yaabo inay ku lug leeyihiin daryeelka caafimaadkaaga ama kuu gaaraya go'aannada daryeelka caafimaad. Sidoo kale sii qaado koobi ah dardaarankaaga daryeelka caafimaadka marka aad cisbitaalka ama xarun caafimaad u tagaysid daryeel.

1. ____________________

2. ____________________

3. ____________________

4. ____________________

5. ____________________

Allina Health

allinahealth.org

ALLINA HEALTH IS A TRADEMARK OF ALLINA HEALTH SYSTEM.
OTHER TRADEMARKS USED ARE OWNED BY THEIR RESPECTIVE OWNERS.
gen-somali-ah-96942 (10/21)